



PPS oo ballaarisay siyaadda ku aadan cabashada iyada oo Guddigu ansixisay in dib u eegis weyn lagu sameeyo

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay wanaajisay isla markaana ballaarisay siyaaddeeda loogu talagalay wax ka qabashada cabashooyinka. Guddiga Waxbarashadu, iyada oo ku jirta kulankeedii Juun 12, waxay ansixisay in dib u eegis lagu sameeyo siyaasaddaheeda dhanka cabashada, iyada oo faahfaahin muhiim ah lagu daray nidaamyada, noocyada cabashooyinka, iyo wakhtiga loo qabto iyo kuwo kale oo dheeraad ah.

Guddigu waxay cod gaaraya 7-0 ku ansixisay [Qaraarka 5660](#), kaasi oo isbedel muhiim ah ku sameysanaya siyaasadda dhanka cabashada ee la qaatay Noofambar 2014 isla markaana degmada ka dhigaya in ay u hoggaansato tilmaamaha cusub ee gobolka.

“Iyada oo la eegayo mabaadii’da PPS lagaga dhigayo meel wanaagsan, waxaan u maleynayaa in tani ay tahay siyaasad ay waalidiintu, haddii ay tahay in ay isticmaalaan, aysan la kulmi doonin dareen niyad jab leh, balse uu noqon doono mid iyaga ka caawiya in loo dhaqaaqo dhanka wax xallinta iyo sidoo kale in la wanaajiyo degmada,” ayuu sheegay Guddoomiyaha guddiga Julia Brim-Edwards.

[\(Akhri siyaasadda buuxda\)](#)

Siyaasadda cusub waxaa lagu magacaabaa “Cabashooyinka Dadweynaha ee Rasmiga ah” (waxaa hore loogu yaqaanay “Siyaasadda Cabashada”). Waxay si fiican u caddeynaysaa sideed qaybood oo ah cabashooyinka sida dhinacyada nidaamyada iyo waxqabadka waxbarasho; caafimaadka iyo badbaadada; takoorida dhanka waxbarashada. Way sidoo kale dejinaysaa wakhtiyada adag oo la qabtay, oo ay ku jiraan 90 maalmood oo ah wakhtiga kama dambaysta ah ee loo qabtay in wax lagu xalliyo

Siyaasadu waxay dejinaysaa tallaabooyin gaar ah oo loogu talagalay gudbinta cabashada. Iyada oo tilmaamaysa in cabashooyinkan loo xalliyo si aan rasmi ahayn, haddii ay suurtagal tahay, iyada oo la adeegsanayo xiriir lala sameeyo dugsiyada ama heer waaxeed, siyaasaddu waxay tilmaamaysaa in nidaam la dejiyo si cabashooyinsha rasmiga ah loogu gudbiyo Isku-duwaha Cabashada ee Degmada, iyada oo la isticmaalayo boosto, email, ama foomka cabashada oo qoraal ah.

Siyaasaddu waxay sidoo kale bixinaysaa tallaabooyinka loogu talagalay rafcaanka, ku socda Kormeeraha Guud, Guddiga iyo Waaxda Waxbarashada ee Oregon. Sharciga waxaa loo sameeyay cabashooyinka qarsoodiga ah.

Siyaasaddu waxay sidoo kale tilmaamaysaa in:

- Turjumaad iyo fasiraad ay heli karaan dadka cabanayaa.
- Ay jiraan ilo la heli karo si looga caawiyo diyaarinta cabasho qoraal ah.
- U doode loogu talagalay qofka cabanaya la oggolaado.
- Degmadu dadka cabanaya ay la wadaagto macluumaadka ugu badan ee suurtagalka ah oo ku saabsan waxyaabaha la ogaaday iyo natiijooyinka.

Siyaasaddu waxay sidoo kale dejinaysaa nidaamyada ku saabsan sida cabashooyinka la xiriira Kormeeraha Guud ama xubnaha ka tirsan Guddiga wax looga qabto.

Qaraarka, Guddigu waxay Kormeeraha Guud ee Guadalupe Guerrero u tilmaantay in uu abuurto isla markaana hirgeliyo tilmaamaha dhanka maamulka oo loogu talagalay hababka iyo nidaamyada oo loogu talagalay xallinta cabashada. Guddiga ayaa sidoo kale u tilmaantay Kormeeraha Guud in uu bixiyo sharaxaad buuxda oo ku saabsan nidaamka cabashada isaga oo joogo xafiiska degmada iyo bogga internet-ka ee degmada, iyo in taasi noqoto mid qofku si sahlan u isticmaali kara ama heli karo.

Qaraarku wuxuu sidoo u tilmaamayaa Kormeeraha Guud in uu soo saaro warbixin ku aadan Guddiga, ugu yaraan sanadkiiba, kaasi oo diiwaanka la geliyo si ay wax u socdaan, arrimaha soo baxaya iyo shaqeynta nidaamyada la xiriira siyaasadda.

“Tani, waxaan rajeynayaa, in uu noqdo qaab cusub oo PPS ay u eegto cabashooyinka, ay u eegto faalooyinka aanu ka helno waalidiinta, ardayda, macallimiinta iyo xubnaha bulshada ka tirsan si aanu u noqono goob waxbarasho oo wax kororsata,” ayay sheegtay xubinta ka tirsan Guddiga ee Rita Moore, oo ka shaqeysay siyaasadda guddiga.